Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
GolahaShacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 8-aad
Documentiga Kal.8-aad kul.5-aad **27/04/2016**

Kalfadhiga 8-aad
Kulankiisa5-aad Saac.fur.12:10gh.Saac.Xir.1:15gd.
Guntinta(Quorum) 146Xildh.
Ajendaha:-

1. **Akhrinta Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah**
2. **Ansaxinta Ajendaha**
3. **Ansaxinta wax ka bedelka Qod.10-aad Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxa Banaan ee Xuduudaha iyo Federaalka .**
4. **Akhrinta 1-aad Hindise Sharciyeedka Maareynta Maaliyadda .**
5. **Akhrinta 3-aad Hindis Sharciyeedka Xannaanadda Xoolaha.**

1.Shir-guddoomiye Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Muxammad Sheekh Cusmaan (Jawaari).

2.waxaa shirka furey Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Muxammad Sheekh Cusmaan Jawaari ,waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah ,uuna akhriyey Xildhibaan Sheekh Shaacir.

3.Guuddoomiyaha Baarlamanka ,wuxuu sheegay kulanka 5-aad ee kalfadhiga 8-aad ee Golaha Shacabka taariikhdu markey aheyd 7kii bish afaraad 2016-ka uu furanyahay iyadoo ay goobjoog ka yihiin 146 Xildhibaan ,Ajendaha Golaha horyaalana furitaanka ka sokow iyo Aayadaha Qur'aanka Kariimka la khriyey. Ansaxinta wax ka bedelka Qod. 10-aad ee Guddiga Madaxa Banaan Xuduudaha iyo Federaalka ,Faqradda 4-aad ee Ajendaha oo ah akhrinta 1-aad Hindise Sharciyeedka Maareynta Maliyadda iyo Farqadda 5-aad Ajendaha horyaalo waa akhrinta 3-aad Hindise Sharciyeedka Xannaanadda Xoolaha, Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyey in Ajendaha sidaa lagu,Xildhibaanadana way ansaxiyeen Guddoomiyahana waa ugu mahadceliyey..

Wuxuu kaloo sheegay in uu rabo in Xildhibaanada ku wargeliyo 11-ka bisha Abril 2016-ka uu R/Wasaaraha uu keenay Golaha Codsi uu ku weydiistey in dib looga dhigo maalinta uu soo bandhigi lahaa qorshaha Doorashooyinka 2016-ka, ilaa 26 Apriil dib looga dhigo Golahana uu ka ogolaadey.

Wuxuu intaa ku darey in shalay ay is arkeyn Ra'iisul Wasaaraha ayna ku ballameyn in maalinta sabtida ay bishu tahay 30 april idiin soo bandhigidoono qorshaha lagu fulinaayo Doorashooyinka Qaranka,wuxuu codsadey in Xildhibaanadda ay goob jog ahaadaan ,maadaama uu arrinkaan yahay mid muhiim ah oo masiirka Soomaaliya loogu meel deyaayo .

Wuxuu kaloo sheegay in uu rabo in Golaha uu u sheegay in Guddoonka uu Xildhibaanadda ka joojiyey Fasaxyadda Safaradda dibadda lagu aadayo waxa aan ka ahayn shaqooyinka hadda socda sida dib-u-Eegista Dastuurka iyo shaqooyinka kale oo muhiimka ah, **Xildhibaanadda Dibadda Jiraan in ay soo wada galaan laga bilaabo maanta oo ay taariikhdeedu tahay 27 Abriil 2016-ka .** Xildhibaankii imaan waaya laga qaadidoono tallaabo adag aan la mid aheyn kuwii hore, Arrimahaan Qarameed ee Golaha Horyaalana ayaa loo bixi karaa tan Dastuurka iyo wax noocaas ah.

Xildh.Shariif , wuxuu sheegay in ay haboontahay marka uu yimaado Ra'iisu-Wasaarada loo sameeyo ilaa 5 Xildhibaan oo su'aalaha Golaha ay qabaan la weydiiyo.

4.Guddoomiyaha Baarlamanka ,wuxuu sheegay in arrinkaa ay ku tala jiraan lana qaabeyndoono,waana arrin aad u wanaagsan.

5.Guddoomiyaha Baarlamanka,wuxuu sheegay in loo gudbayo Ajendaha 3-aad oo ah Ansaxinta wax ka bedelka Qod.10-aad una yeeray Guddiga Arrimaha Gudaha Xuduudada iyo Federaaleynta si ay u akhriyaan warbixintooda.

Xildh. Daahir Amiin Jeesow oo ah Guddoomiye K/Xigeenka Guddiga Arrimaha Guddaha Xuduudaha iyo Fedraleynta ayaa akhriyey warbixinta Guddiga

Wuxuu shegegay in sharciga xuduudaha iyo Federaalka uunan dhigaynin xilliga Guddiga Madaxa Banaan xilhaynta uu ku jaan ganyahay xilliga baarlamanka Federaalka Soomaaliya ee bisha Augost 2016-ka , guddiga waxaa ku dhacday dib u dhac, waxay aheyd in muddo 90 casho ah in lagu aasaasayo guddiga madaxa banaana ,bishii Julay 2015ka ayaa la ansaxiyey muddadii la qiyaasayay in ay ugu harsantahay bilo yar, guddiga waxay sooweydisteyn in xilliga shaqada ay gudan lahaayeen ay ka dhumeen,hadda guddiga waxay rabaan in waqtiga loo kordhiyo.

Marka uu Guddiga Arrimaha Gudaha ay dib-u-Eegis- ka sameeyeen qod-10-aad ,ayey waxay soo jeediyeen in bisha 31.07.2020-ka in shaqada looga dhigo, Guddigana way is lagarteyn .bisha ay soo sheegeyn guddiga 31.07.2020-ka ,in guddiga Madaxa Banaan shaqadiisa loo egmado .

Xidh-Maxamed cabdi yuusuf. Wuxuu sheegay in uu u baahanyahay caddeyenin laga siiyo guddiga Madaxda Banaan ee dastuurka ku qoran ma waxay leeyihiin waqti shaqada u bilaabmayo iyo waqtiga shaqada u dhamaanayo mise waa guddiga ku xiran Baarlamanka Federaalka Soomaaliya.

6.Guddoomiyaha Baarlamanka- wuxuu sheegay in Qod. 10-aad hadda la rabo in uu golaha wax ka bedelo wuxuu uu oranayaa guddigaan madashiisa waxay ku xirantahay madasha Baarlamaanka wax shaqo hadda la dhameystirey oo federaaleynta ahna ma jiro saa daraadeed waxaa loo kordhinayaa waqtiga si shaqada u dhiman ay u dhameystiraan.

7.Xildh.C/llaahi Goodax Barre,wuxuu sheegay in Guddiga shaqadiisa uu qabtey ,wuxuu xukuumadda uu ka codsadey in Guddiga lala sugo dowladda Cusub ee imaaneysa.

Xildh. Jaamac wuuu sheegay in guddiga uu yahay guddi sharci ah oo jira ,waa in la sheegaa mudada loo kordhinaayo guddiga

Xildh.Cabdi Dhuxulow,wuxuu sheegay in aan shaqo loo ogoleyn in ay qataan shaqadooda Dastuuriga ah waa in la ogodaa shaqada ay qabanayaan iyo in muddo 1(hal) sano ah loo kordhiyo .

Xildh.Yaasiin Cabdi Seed,wuxuu sheegay **Qod.49-aad farq.1 iyo 2-aad ee Dastuurka uu arrinkaan qeexayo.** Waxaa la ogyahay waxa uu qabanaao guddiga, marka waa in la sheegaa. Guddigaan wuxuu la mid yhay Madasha hadda jirta meesha ay ku egyihiin ayuu guddigaana ku egyahay.

Xildh.Cabdi Samad,wuxuu sheegay in ay aheyd in guddigaan uu ka shaqeeyo waxa loo egmadey loona ogolaado in uu shaqeeyo,wixii caqabado ah oo qaldan in ay saxdo .

Xildh.Goodir,wuxuu sheegay in maamuladda jira ay yihiin kuwa ku meel gaar ah,waxay aheyd in guddigaan uu shaqeeyo wayna caddahay sharciga uu ku shaqeeyo,wuxuu soo jeediyey in codka la siiyo.

Xildh. Seynab Maxamed Caamir,waxay sheegtey in ay sakengareyneyso Xildhibaan Cabdi Samad,ayna yihiin mas'uuliyiin maamul ku shaqeeyo sharciga xuduudada ma jiro ,waxay soo jeedisey in Golaha Baarlamanka uu siiyo Guddigaan sharciyadiisa.

Xildh. Barre Ugaas geedi, wuxuu sheegay in guddiga uu doonayo in waqtigiisa la siiyo si ay u shaqeeyaan.

Xildh.Sareedo waxay sheegtey in guddiga Madaxa Banaan uu yahay guddi Qaran ,waxay soo jeedisey in guddigaan uu shaqeeyo ilaa laga gaaro doorasho xur ah one man one vote.

Xildh. C/llaahi Coonka,wuxuu sheegay in guddiga loo daayo shaqadiisa Xuduudada iyo Federaalka ,wixii wax ka bedel ahna hala sugo Xukuumadda Cusub.

Xildh.C/raxmaan Suge,wuxuu sheegay in aan la kala reebin guddiyadda Madaxa Banaan.

Xildh.Caasho Koos waxay sheegtey in guddiyadda Madaxa Banaan ay la mid yihiin guddiga shaqaalaha rayidka ah ,guddiga dib-u-heshiisiinta Qaranka ,marka yaan meel loogu dhicin guddiga Madaxa Banaan Xuduudada iyo Federaalka .

8.Guddoomiyaha Barlamanka ,wuxuu sheegay in Qod.10-aad farq.3-aad uu qorayo in Guddiga Madaxa Banaan Xuduudaha iyo Federaalka uu ku egyahay waqtigiisa xilliga dowladda ay u hartey .Wuxuu kaloo sheegay in uu soo jeedinaayo guddiga ee qod.10-aad in loo codeeyo ,haddii la jebiyo in loo baahanyahay in 10-Xildhibaan ay soo qoraan qoraal soona jeediyaan.

Guddoomiye K/X.Guddiga Arrimaha Gudaha . Daahir Amiin Jeesow,wuxuu sheegay in uusan Dastuurka ku qorneyn maandheydka ama mudada uu guddiga uu ku egyahay .

9.Guddoomiyaha Baarlamanka ,wuxuu sheegay in aan cod lagelinkarin maanta waayo waxaa jooga kooramka ahaan 121 Xildhibaan ,marka ma dhama kooramka wuxuu sheegay in dib ay u dheganayaan.

Kadib Guddoomiyaha wuxuu u yeeray wasiir k/xigeenka,Wasaaradda Maliyadda Mudane **Maxamed Xayir Ibraahim** Si uu u akhriyo akhrinta 1-aad Hindise Sharciyeedka Maareynta Maaliyadda (PFM).

10.Wasiir K/X.Wasaaradda Maaliyadda,Mudane Maxamed Xayir Ibraahim, wuxuu akhriyey Hindise Sharciyeedka Maareynta Maaliyadda (public Finance Management(PFM)Act marso 2016.wuxuu codsadey in sharcigaan la fududeeyo .

11.Guddoomiyaha Baarlamanka ,wuxuu sheegay in Hindise Sharciyeedkaan loo gudbiyo guddiga ay khuseyso oo wax ka bedel ku sameeyo.

Kadib,Guddoomiyaha wuxuu u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Xannaanadda Xoolaha Mudane Saciid Maxamed Cali si uu u akhriyo akhrinta 3-aad ee wax ka bedelka guddiga uu ku soo sameeyey warbixinta sharciga xanaanadda Xoolha .

Guddoomiyaha Guddiga Xannaanadda Xoolaha Mudane .Saciid Maxamed Cali , wuxuu akhriyey Sharciga Hindise Sharciyeedka Xannaanadda Xoolaha oo ay wax ka bedel ku soo sameeyeen . wuxuu sheegay in xildhibaan qaar ay codsadeyn in la keeno sharcigii hore ee dalka u yaaley ,way soo diyaariyeen wayna keeneyn waxay dhigidoonaan Laiborary-ga Baarlamanka.

Qodobadda ay wax ka bedelka ku soo sameeyeen Guddiga waxaa ka mid ah :

1.Qod.(g)-waxaa lagu darey **DALKA (Si waafaqsan Shuruucda Caalamka laga dhigay si waafaqsan shuruucda Dalka iyo Calamka u degas an)**

2.Qod.2.2.2 xarafka b-waxaa lagu kordhiyey marka ay ka helaan ogolaansho wasiirka ,wuxuuna u qornaa : soo dejinta ,qaybinta ,keydinta iyo halgadida daawooyinka xoolaha iyo qalabka shaqo.

3.Qod.2.3.4 ereyga **Ururs**anyihiin waxaa lagu bedelay **ay xubno ka yihiin.**

4.Qod.4.7.6 waxaa laga saarey **waxaa kaloo amar ku bixinkara in la dilo eeyaha meelkasto ay joogaan.**

5.Qod.5.1.1/1xarafka (a) waxaa laga saarey **haddii uusan jirin sabab maangal ah ,**isla qodobkaan waxaa laga saarey **illa heer uu baaba'o sabab la.**

6.Qod.7.1.waxaa lagu kordhiyey Lambar **4-xoolaha marka la saarayo gaadiidka waa in lagu raraa goobo farsameysan looguna tala galay ,si loo ilaaliyoxuquuqda xayawaanka .**

7.Qod.9.1 wuxuu ka hadlayaa **dhaqaatiirta aan dowliga aheyn waxay u kala saareyn sharciga dhaqaatiirta dan guud iyo dan gaar** waxaa laga dhigay **dhaqaatiirta dowliga ah iyo dhaqaatiirta aan dowliga aheyn.**

8.Qod. 10.2.3/1 waxaa ku qornaa **in la cusbooneysiiyo sannadkii mar waxaa lagu bedelay in la canshuuro sannadkii mar.**

15.Qod.14.2.1 shuruucda shirguddoonka la doonayo ee guddiga dhaqaatiirta ,lambar 2. Dadka soo weydiisanya waa inay ahaadaan. 40 ilaa 75 ,**waxaa laga dhigay 35 ilaa 60 jir .** lambarka 3-aad meeshii ay aheyd **waa in uu leeyahay khibrad 15 sanno laga dhigay 5 saano.**

16.Qod 14.2.2 xarafka a)-doorashadda guddoomiyaha golaha waxay u qorneyd: xubin sharafeed uu soo magacaabey Wasiirka kaas oo noqonaaya **shir-guddoonka guddiga doorashada ,**waxaa lagu bedelay **guddoon waxaa noqonkara qofka ugu da'da weyn dhaqaatiirta iyo xubnaha meesha fadhiya.**

Wuxuu kaloo intaa ku darey in ay ku wada dareen wixii talo ah ay soo jeediyeen Xildhibaanadda Baarlamanka ayna ku soo dareyn warbixintaan. **Tusaale ahaan in la wanaajiyo fayadhowrka uunka xoolaha ka yimaado sida Hilibka iyo Caanaha ,wasaaradda waxay la qeybsadeyn waxay u sheegeyn guddiga Xannaanadda Xoolaha in ay soo wadaan sharci Caanaha lagu Maareynaayo howlahooda iyo tayeentooda.**

Guddiga Beeraha ,Xoolaha, Horumarinta Reer Miyiga iyo kheyraadka Badda ,waxay ka codsadey golaha Baarlamaka in loo codeeyo kol haddii uu marey akhrinta seddexaad.

12.Guddoomiyaha Baarlamanka Mudane ,Jawaari wuxuu ka codsadey guddiga Xannaanadda Xoolaha in ay soo diyaariyaan wixii laga bedelay una keenaan Golaha sida ugu dhaqsiyaha badan .

Kalfadhiga 8-aad kulankiisa 5-aad uu shirguddoominaayey Guddoomiyaha baarlamanka JFS. Mudanae Muxammad Sheekh Cusmaan (Jawaari),wuxuu sheegay in uu shirka xiranyahay saacadu markey aheyd 1:15gd.